



## **Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) Waxa La Siiyey Deeq Lacageed oo Dhan \$8.2 milyuun Si ay Ugu Dhisaan Soo Saarista Maamulayaal Udub-dhexaad u ah Sinnaanta**

Dugsiyada Dadweynaha Portland wuxuu ka mid yahay sideed dugsi degmo oo wadanka Maraykan laga doortay inay helaan deeq lacageed oo dhan \$8.2 milyuun, deeqadaasi oo ay ka helaan [Wallace Foundation](#) muddo sanno ah, in lagu dhiso sidii loo shaqaaleysiin lahaa loona tababari lahaa maamulayaal xudun u noqda sinnaanta. [Deeqadani](#) lacageed waxay taageeri doontaa dugsiyada degmadu sidii ay u dedejiin lahaayeen horumarka dhinaca sinaanta jinsiga iyo cadaalada bulshada ee ka go'an ardayda iyo bulsho weynta PPS.

“Waxaa muhiim ah in arday kastaa helo fursad uu ku dareemo hoggaamiyaasha iskuuladu inay wakiilo ka yihiin bulshadeena kala duwan,” sidaas waxaa yiri Guddoomiyaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland, Guadalupe Guerrero. “Ardeydeena aan caddaanka ahayn ee midabka lehi waxay si gaar ah uga faa’iidaayaan marka ay hoggaamiyaasha iskuulada ku arkaan ay yihiin hoggaamiyaal iyaka u eg, sidoo kale waxay arkayaan suurtagalnimada, fursada iyo lahaanshaha.”

Iyada oo la dhisayo caddeyno adag oo dhammeystiran, lana jaanqaadeya in la soo saaro maamulayaal isku daba jiraa waxay kor u qaadaysaa guusha ardayda guud ee dugsiyada degmada, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay iskaashi la sameyneynaa sidii loo sameyn lahaa dariiqooyin lagu soo saaro hoggaamiyaasha dugsiyada oo awood u leh horumarinta himilada nidaamka iskuulada ee ku dhisan horumarinta bulshada kuwaasi oo ah [qorshaha istaraatiijiyada](#) degmada. Deeqadan lacageed waxay noo oggolaan doontaa sidii aan diirada u saari lahayn diyaarinta iyo tababarida maamulayaal wata agabkoodii iyo istaraatiijiyad ay ku horumarinayaan sinaanta jinsiga, istaraatiijiyaduna waxay tahay sidii shaqada loo qori lahaa murashariixin maamulayaal oo xudun u ah sinaanta, iyo kobcinta jawi loo dhan yahay taasi oo maamulayaasha u diyaarin doonta inay guuleystaan iyo inay waqtiga fog shaqada sii joogaan.

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay iskaashi la sameyn doonaan Jaamacada Portland State University, Lewis & Clark College, Guddida Hawlgalinta iyo Tay'adda Macallimiinta Oregon (TSPC), iyo Golaha Horumarinta Macallimiinta Oregon (EAC) in la sameeyo qeexitaan la wadaagayo oo ku saabsan sinaanta jinsiga ee hoggaanka iskuulada iyo diyaarinta hoggaan adag oo udub-dhexaad u ah sinaanta inay ka shaqeeyaan iyaga oo u addeegaya Dugsiyada Dadweynaha Portland, iyada oo tani ay bixineyso marag muujin muhiim ah oo wargalin karta dadaalada laga wado guud ahaan gobolka.

“Hab-nidaamayaha Macallimiinta Oregon iyo Guddida Hawlgalintu waxay dib u qaabeyn ku sameeyeen Hab-nidaamayaha hoggaanada Iskuulada Oregon, sidii ay u xoogga u saari lahaayeen mas'uuliyada maamulayaashu sidii ay hormood uga noqon lahaayeen jawi waxbarasho oo loo siman yahay iyo guusha ardayda iskuuladooda,” sidaasi waxaa yiri Anthony Rosilez, J.D, Ph.D., agaasiimaha fulinta ee TSPC. “Ka qeybqaadashada aqoonsiga qaran ee hindisahani wuxuu si weyn u wargalin doonaa abuuritaanka qaab dhismeed dhammeystiran oo loo diyaarinayo hoggaamiyaasha iskuulada dhammaan gobolka Oregon.”

Bayaan ay wadaageen, Portland State University iyo Lewis & Clark: "Deeqadani shanta sanno ahi waxay hakin doontaa dhacdooyinka taariikheed ee nidaamka waxbarashadeena inaga oo u diyaarinayna iskuuladeena hoggaamiyaal udub-dhexaad u ah sinaata. Waxaan rajeyneynaa iskaashiga ay Dugsiyada Dadweynaha Portland sameynayaa inuu abuurto isbedelo iyo waxyaabo cusub oo la soo kordhiyo kuwaasi oo macno weyn u sameyn doona noloshu ardayda kala gedisan."

[Cilmi baaristani](#) waxay muujisay in maamulayaasha iskuuladu ay saameyn weyn ku yeelan karaan waayo-aragnimada ardayda iyo natiijada ka soo baxda waxbarashadooda. Deeqa bixiyaha Wallace Foundation waxay sameyn doonaan cilmi baaris ballan qaadaysa istaraatiijiyadaha iyo guulaha oo qeyb ka ah deeqda lagu taageerayo wargalinta iyo in lagu kordhiyo wada hadalada qaran ee koraya sidii loo horumarin lahaa sinaanta hoggaamiyaasha waxbarashda dadweynaha.

Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxay qeyb ka yihiin todoba dugsi degmo oo kale kuwaasi oo la siinayo deeqdani lacageed ayna ka mid yihiin Dugsiyada Dadweynaha Magaalada Baltimore (Maryland), Magaalada Columbus (Ohio), Dugsiyada Dadweynaha Degmada (Washington, D.C.), Dugsiyada Degmada Fresno Unified (California), Dugsiyada Degmada Jefferson (K.Y.) iyo Dugsiyada Degmada San Antonio Independent (Texas).